PJ
2534
.A32
S88
1987



# SUUGAANTA DHALLAANKA

AAMINA X. AADAN

PJ
2534
.A32
S88
1987

INDIANA UNIVERSITY
LIBRARIES
BLOOMINGTON

7/10/89

# TUSMADA BUUGGA

## SHEEKOOYIN

Bogga

Xidinxiitadii Dhaaratay . . . . . . . . . . 5

Suul Saancaddale . . . . . . . . . . . . 7

Waxa ay Waraabaha iyo Libaaxu u coloobeen . 10

Dadabgalkii dacawada . . . . . . . . . . 13

Yoonis Tuug . . . . . . . . . . . . . . 18

Dheg-dheer . . . . . . . . . . . . . . 24

Wiil Waal iyo wilkii uu abtiga u ahaa . . . . 29

Dacawo socodkeediina ka tagtay kii Nebigana gaadhi weyday . . . . . . . . . . . . 31

Madax-Kuti . . . . . . . . . . . . . . 32

Carruur iyo Reer-Guura-Raac . . . . . . . 34

Maxaa lugta Dhurwaaga gaabiyay . . . . . 35

Awrka Cirka . . . . . . . . . . . . . 36

Waxii daacad ahayni dabaday ka xumaadaan 38

Kaba-Calaf iyo Huryo Ugaas . . . . . . . 41

Isha Cali ka lulata . . . . . . . . . . 44

## HEESO

Roobow . . . . . . . . . . . . . . . . 46

Uuray . . . . . . . . . . . . . . . 47
Af. dalool . . . . . . . . . . . . . . 48
Naa hooy Dayo . . . . . . . . . . . 49
Tuugow . . . . . . . . . . . . . . . 50
Mulacow . . . . . . . . . . . . . . 51
Waxa goorta guday . . . . . . . . 52
Aabo iyo Hooyo . . . . . . . . . . 53
Alla Dheeriya . . . . . . . . . . . 54
Wacays . . . . . . . . . . . . . . . 55
Aabahay . . . . . . . . . . . . . . 56
Miido iyo Muuse . . . . . . . . . . 57
Faraskayga . . . . . . . . . . . . . 58
Dhurwa' Adhiga Eebbaa leh . . . . . 59
Haawiyee . . . . . . . . . . . . . . 60
Daba-huwan . . . . . . . . . . . . . 62
Carrab Jalqin . . . . . . . . . . . 65
Biitooyin . . . . . . . . . . . . . 67
Kun Bullow . . . . . . . . . . . . 69
Gorayo . . . . . . . . . . . . . . . 70

Heesta maqasha . . . . . . . . . . . . . . 71
Edegso . . . . . . . . . . . . . . . 71
Deleb . . . . . . . . . . . . . . . . 74
Googaalaysi . . . . . . . . . . . . 75
Furaha Googaalaysiga . . . . . . . . . . 79
Shirkii Habar-dugaag . . . . . . . . . . 83
Tira ku tartan . . . . . . . . . . . . 88
Sheeko dhamaatay . . . . . . . . . . . 89

## ARAR

*Intii uu qoraalka far Soomaaligu tisqaaday, waxa suugaanta soomaaliyeed u beryey waa cusub. Markii ugu horreysay ayaa afkeenna dabargo'ii laga badbaadiyey; markii u horreysay ayaa sheeko soomaaliyeedka gaabani madaxa kor u qaaday; markii u horreysay ayaa la isku dayey in la xidhiidhiyo maansadeennii siirsanyad. Eebbe mamahadii e, markiiba dad fara badan ayaa isku dayey inay wax qoraan. Waxaad mooddaa in shakaal la inaga gooyey, ama aynu qallaynayno farallo aynu hore u gefnay.*

*Dadkaas niyadda birta ah la sara kacay waxa ka mid ah qoraha buuggan.*

*Dhuuxa ama ujeeddada kitaabkan haddaynu eegno, waxa uu kobcinayaa garashada fikiriga ah ee ubadkeena. Buuggu waxa uu ka kooban yahay sheekooyin gaagaaban oo shacbi ah, heeso, carrab jalqisyo, googaalaysi iwm. Xagga sheekooyinka haddii aynu fiirinno, waxa ay isugu jiraan qaar carruurta maaweelinaya, qaar asluubta baraya, qaar nolosha u laylinaya, qaar maankudareenkooda (imagination) kordhinaya iyo qaar ka fikirsiinaya.*

*Heesuhu iyagu door weyn baa ay ka qaataan nolosha ubadka. Sida la ogyahay carruurtu*

*waxa ay markiiba qabsan karaan wixii jiib iyo jaan leh. Heesahuna shardigaas ayey fuliyaan.*

*Arrintu si kastaba ha ahaatee, kitaabkan, oo ah kii u horreeyey noociisu, waxa aan hubaa inuu kaalin weyn ka geli doono xiisagelinta iyo barbaarinta ubadka. Waxa kale oo aan ku kalsoornahay inuu uga fududaan doono kutubka ay hadda dhigtaan qaarkood. Kuwaas oo ay iila eg tahay in ay ku jiraan qaybo ka heer sarreeya Carruurta.*

Nasiib Wanaagsan.

**MAXAMED XAASHI DHAMAC**
***(Gaarriye)***

# HORDHACA

Suugaanta Af Soomaaligu waa mid tiro ba dan. Waxa jirta in suugaantu ay u kala baxdo dhowr jaad. Qaybaha suugaanta waxa ka mid ah ta carruurta oo aan halkan tuducyo ka mid ah ku soo qaadayno.

Suugaanta carruurta waa gundhigga suugaanta kalaasikada ah. Sababtuna waxa ay tahay haddaan ilmaha lagu barbaarin suugaan-carruureeda waxa dareenkooda ka luma dhadhansiga iyo hayalka suugaanta kalaasikada.

Suugaanta carruurtu waa waxa ku xidha facba faca ka dambee a. Suugaanta carruurtu waa sheekooyinkii ay ku qosli jireen kumaannan ayeeyo iyo awoowe, markii ay dhalaan ahaayeen.

Waa heesahii iyo maadaysyadii kuwii inaga horreeyay. Fac ba fac buu u gudbin jiray suugaantan oo kale iyada oo qosol, maad, argagax, maaweelo iyo murtiyi ku dheehan tahay. Suugaantan oo kale waa hal abuurkii ummadda oo dhan. Qof gooni u çuriyay ma jiro ee waa maskaxdii dadka oo dhan. Suugaantu waxa ay salka ku haysa dhaqanka dadkeena. Waxa ay tilmamaysaa sumadaha inoo goonida ah. Haddii aad la isugu taxalujiyo, suugaantan oo kale waxa la-

ga tix raaci kari lahaa qodobbo sooyaalkeena u dhidibo ahaa.

Hase ahaate, hadda arrinta aan hiyiga ku hayey markaan ururinayey suugaantan, waxa ay ahyd carruurtu in ay isku madadaaliyaan. Taas darteed waxa aan Eebbe ka rajaynayaa in ay sheekooyinkan, heesahan iyo carabba jalqiintanu carruurta Soomaaliyeed riyaaq iyo rayrayn ay kala kulmaan.

Inta aanan tuducan xidhin waxa aan mahad u naqayaa Jaallayaasha ah Maxamed Xaashi Dhamac (Gaariye), Muuse Galaal, Axmed Cabdi Dacar, Khadiija Cabdi Faarax, iyo hooyaday Xaaji Haweeya Meygaag. Jaallayaashaa oo aad iiga kaalmeeyey ururintii buuggan.

Waxan kale oo aan xusayaa Xaali Faarax Jaamac iyo Khadra Cumar Isteeliye oo garaacida xil weyn iska saaray, iyo Fadumo Maxamed Addan.

Jaalle Maxamed Cabdalle waxa'uu iga kaalmeeyay dhinaca Farshaxanka. Carruurta Soomaaliyeedna waxa aan leeyahay «Sannad wanaagsan, badhaadhe iyo barwaaqo leh oo carruurta adduunka oo dhan aad kala qayb gashaan».

**AAMINA XAAJI AADAN.**

## XIDINXIITADII DHAARATAY






Maalin ayaa bahalohoose iyo bahal sareba shireen. Waxana laga shiray sidii ay xoolo u dhaqan lahayeen. Markii shirkii la isugu yimi ayaa midba kol baanay. Waxana aroos lahaa libaax oo boqorka habardugaagna ahaa. Waxa libaaxa sado loogu keenay hal gool ah. Shirkii ayaa la isku af garanwaayay; ugu dambaystiise waxa lagu guddoomiyay in mid weliba goonidiisa u ugaadhsado.

Haṣe ahaatee, inta aan shirka lagu kala dareerin waxa lagu goostay in libaaxa hasha loo qalo, marka la qalona uuska, dhiiga iyo uurkujirta

oo aan beerka iyo kelyuhu ku jirin habar dugaag oo dhami ay qaybsadaan.

Intii dooddu socotay ayaa xidinxiito istidhi, «Alla hortii geedkan kor oo ku naso». Markii ay geedkii kortayna haad baa sheeko u qabtay, dabeedna hurdaaba la tagtay.





Goor aan goorba ahayn oo shirkii lagu kala dareeray ayay xidinxiitadii hambaaburtay. Saa waxa ay istidhi, orod oo dooddii dhammaataye hilibkii badhkaaga doono. Markii ay soo degtay ayey aragtay meeshii oo gelengel ah. Halkaa ayey ku qaday. Inta ay is cannaanatay ayey dhaaratay oo tidhi:



Haddaan hurdooy ku seex-
do
Haddaan geedow ku fuulo
Haddaan hurdooy ku seex-
do
Aabahay xiid
baan xalaal
igu dhalin.

## SUUL SAANCADDAALE
## ama «Suul Cawro»

Beri waxa jiray bahal laga yaabay oo la yidhaahdo Shanbooc leh. Bahalkaasu waxa uu magacaa ku mutaysatay isaga oo lahaa shan booc.

Shaanbooc waxa uu ahaa bahal marka uu wax cunayo aan calaalin ee mar qudha uun dig ka siiya.

Maalintii dambe ayaa Shanboocle u yimi laba hablood oo adhi la jooga. Midi fariid baa ay ahayd oo inta ay tii kale ku tidhi «Naa bal fiiri bahalkan shanta booc leh», ayey adhigeed soo duubtay oo big la tidhi. Nacastiina sidii ay ugu dhaygagsanayd bahalkii ayaa uu ku yidhi, «Naa adhigaaga ayaan wada cunayaa, haddii aad i sheegtidna adaan ku cunayaa».

Gabdhii nacasta ahayd ayaa gurigii timid tii oo adhigii aan bartiis wadin. Markii lagu qayliyay ee la dagaalay ee la yidhi «Naa belo ha ku qaadee xaggee adhigii kuugu war dambeysay», ayey inta ay baqatay tidhi: «Shanbooclaa cunay adhigii». Shanboocle waa uu maqalayey marka ay sidaas lahayd. Markii guriga laga wada tegay, ayey gabdhii welwelshay oo waxa ay istidhi kolayba Shan-boocle waa uu ku cuni doonaa ee xaggaad naftaada dhigtaa. Haan boos ah oo Qabo-weyn la yidhaahdo ayaa inta ay gundhada jartay isku aabudhay. Wax yar dabadeed ayaa waxa yimi shanboocle oo ka tuuraya. Saa haantii buu bujiyay.

Sidii lagu yiqiin shanboocle waa uu isgiriirixiyay, naagtii buu miciyaha ka buuxsaday oo ma uu calaalin ee dig baa uu ka siiyay. Markii uu isyidhi alayle waad cuntay ee iska foof tag ayaa habartii guriga lahayd inta ay soo mayracday maqashii istidhi haantiina soo dhaanso.

Markii ay soo dhaamisayna waa ay ka cabtay haantii. Halkaas waxa habartu ay ku liqday suul ka hadhay inantii nacasta ahayd.

Habartii uur ayaa ay yeelatay; markii ay umushayna ilmihii waxa uu noqday mid gaaban oo suulka baa'bacada le'eg.

Sidaas darteed, waxa lagu magacaabay Suul. Suul markii uu qaan gaadhay waxa lagu dhejiyay Suul Saancaddaale, waayo dabin iyo sursuur ayaa uu dhigi jiray. Suul waxa uu ku tashaday in uu reerka keligii u hadho. Maalintii dambe ayaa uu hooyadii ku yidhi, «Waxa uu Aaba ku yidhi «Weylaha oo dhan wada qalqal».

Inta uu orod ku dhuftay ayaa uu odaygiina ku yidhi: «Habartii weylahii oo dhan wada qashay; waxana ay tidhi, odaygii waa uu ila guursaday oo markaa anaa reerkan baabi'in» Odaygiina habartii buu waran ula yimid oo hanaqa ayaa uu jaray. Suul baa haddana abtiyadii u tegay isaga oo iska oohinaya oo waxa uu yidhi «Odaygii hooyaday buu dilay oo qudha ka jaray. Kola u aarimeysaane kaalaya oo iga aasa». Mid habarta wa-

laaladeed ka mid ahaa baa amlay soo qaatay oo odaygii hanaqa jaray.

Suul walaashii ayaa, kolkaa, barrooratay, waxana ay tidhi: «Waryaa Suul, Suul saancaddaale xaggee baad taal?». Markaas ayuu yidhi: «Sacadhiin dabadiisa». Haddana waxa uu u tegay gabadh deriskood ahayd oo waxa uu yidhi: «Walaashay waxa ay lahayd anaa ka adag heblaayo».

Tiina budh ayaa ay isla soo daruurtay oo Suul walaashii baa ay madaxa qaaday. Iyana Dhulkaba u lamay dhicin ee halkaas ayaa ay ku qudh baxday. Suul baa riyaaqii iyo raynrayntii ka badatay. Waxa uu ku tashaday «reerka gebigiisaba adiga baa iska leh». Caano ayaa uu cabay oo cabbay oo sanka ka keenay. Markii gorcrkii u dambeyay uu fuuqsaday, ayey bar caana ihi xundhurta kaga dhacday. Kolkaas ayaa uu isyidhi taasina ayaanay ku dhaafine soo leef. Soo leeftuu is yidhi ayaa inta uu qarxay oo dillaacay, qac kala yidhi. Halkaas ayaa uu Suul ku geeriyooday.

# WAXA AY WARAABAHA IYO LIBAAXU U COLOOBEEN?





Beri baa la yidhi waxa deris ahaa Waraabe iyo Libaax. Waxaana midba lahaa kadin geel ah. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa Geelii Libaaxu u arooray meel loo sii-guullo toban casho. Markaas ayaa uu u tegey Waraabihii oo ku yidhi: «Waar Cumarow, waa kaas Geeli iga maqan e, i amaahi qaalin aan kuu magdhabo hadhow marka Geelu ii soo noqdo».

«Waa tahay ee ma ballanqaadaysa inaad qaantaas iska bixi doonta». Waraabihii oo shakisan ayaa Libaaxii ugu jawaabay.

«Waar, ma awel baan wax kaa dafiri jirey, maxaad Cumarow sidaas iigula hadlaysaa?». Libaaxii oo xanaaqsan baa yidhi.

Arrintu si kastaba ha ahaatee, Waraabihii waxa uu siiyey Libaaxii qaalin gool ah oo uu Geeliisa ba ugu jeclaa.

Markii Geelii Libaaxu soo laabtay, ka dib ayaa Waraabihii u tegey Libaax oo uu weydiistay qaalinkii; markaas ayaa Libaaxii ugu jawaabay:

«Haddii aanad Geela iiga dul dhaqaaqin, wax kale ayaad isku-arki doontaa. Waar ma anigaad magdhow igaga doonaysaa qaalinkii yaraa ee caatada ahaa ee aad adiguba iska nacday?»

Waraabihii ayaa aad u kululaaday oo yidhi, «Waar hooy, Libaaxow, isla-weynidaasi ina kala saari maysee, qaalinkaygii aad baruurtiisii liqinyo beryo dhan ugu jiiftay magtiisii i sii».

Markii erayadaas la isweydaarsaday, ayaa Libaaxii hanjabay oo yidhi, «Waxba ku siin maayo Waraabow ee waxaad doontid samee». Halkaas ayaa Waraabihii ka hoonbiyey isaga oo muraarodillaacsan. Isla habeenkiiba waa uu ka ag guuray Libaaxii.

Laba casho ka bacdi, ayaa Waraabihii ku soo noqday Libaaxii oo uu u tiriyey tixdan, isaga oo markaas ku haddadaya inuu jaallayaashiisa faraha

badan leh u yeedhan doono oo qaalinkii xoog kaga qaadi doono Libaax.

Tuurtaas haddii aan tagaan toban ka soo qaado
Ta xigtana haddii aan tagaan, toban ka soo qaado
Goodheerayaashii haddaan qaylo maqashiiyo ay
Jaallayaashay soo qamaamaan markaa, Inma qa-
looqocondho, wallee, qalinkaygii caddaa qaanti
hadhi mayso.


Gabaygaas ayaa Libaaxii aad uga cadhaysii-
yey, markaasuu markiiba uga jawaabay oo yidhi:

Dhuruqsane dharaaqsane
Kanow qaar-dambe xabaalle
Farro hadaad sheegtay
Anjguna qaaracnimo loo dhashiyo,
Qarannimaan sheegtay
Wallee qaalinkaagii caddaa,
Qaantii heli maysid

Markaas ka bacdi ayaa la isu ciidan urursaday. Dabadeetana dagaal qadhaadh ayaa halkaas ku dhexmaray Waraabayaashii iyo Libaaxyadii. Inkasta oo ay waraabayaashu aad uga fara badnaayeen, haddana labada dhinac maydku waa is tuuray.


Haddaba, colaaddii ka abuurantay qaalinkaas illaa maanta way socotaa oo mar allaale marka ay Waraabe iyo Libaax is-arkaanba waa ay dagaallamaan.

# DADABGALKII DACAWADA



Beri waxa jirtey dacawo aad iyo aad u qurux badnayd oo rag badan oo habar-dugaag ihi caashaqeen oo ay damceen inay guursadaan. Hase yeeshee, kii u soo haasaawe tagaba lama hadasho. Kibirka iyo islaweynida dacawadaasi waxa ay gaadhay dhammaan habar-dugaag oo dhan oo waxa ay noqotay wax had iyo jeerba laga sheekaysto.

Habeenkii dambe ayaa waxa meel isugu yimi dhallinyaro badan oo guur doon ah oo dhammaantood jacayl u hayey dacawadaas. Waxana ay soo hadal qaadeen arrimo laga sheegay dacawadaas. Dabeeto Libaax baa soo jeediyey in ay u cayaargudaan, taasoo ay markiiba isku raaceen. Markaas ka dib waxa isa soo raacay lix dhallinyaro ah oo iyaguna aad u qurux badnaa oo dhammaantood cawaandi kala jeexday, si fiicanna u lebisnaa. Kuwaasi waxa ay ahaayeen Galow, Libaax, Weere, Xoor, Waraabe iyo Dabagaalle.





Markii ay Reerkii yimaadeen ayaa ay cayaar ku dhufteen. Markaas ayaa uu sacabku isqabsaday. Markii hore loogu soo bixi waayey ayaa Libaax oo aad u cod wanaagsanaa ku luuqeeyey hees oo uu yidhi:

Naa giniy eegalaas dahabaay
Raggan soo cayaar guday
Waa wada gayaankaa
Naa Dayooy ilwaad qurux
Afka qalin laguu mari ee
Mar uun oodda soo jebi

Muddo yar ka bacdi waxa soo banbaxay hablo fara badan oo ay ku jirto Dayo. Sida runtu tahay, Dayo aad bay u ciyaar jeclayd; markii ay sacabka ciyaarta maqashayna waxa qaaday saarkii ciyaarta oo waxaba jirtey in ay iyadu hablo badan soo kicisay.

Markii ay Dayo Ciyaartii timid, sida dhabta ah, waa la illaaway hablihii kale oo dhan. Markaas ayaa nin weliba doonay in aan Dayo caawa looga dheerayn; cayaartiina aad bay u kululaatay. Judhiiba Galow ayaa heesay oo yidhi:

Ninkan galow la leeyahay
Laba galac garbaha saar oo
Gaashaan wiyil ah qaad oo
Geel boqol ah soo dhici
Ee Dayooy mayla dadab geleysa

Libaaxii ayaa ka cadhooday heesta uu ka ho-

rorsaday Galowgu waayo ragga soo ciyaarguday Galowga ayaa la mooddaayey in uu ugu liito; sidaas daraadeedna aad baaba loo yasayey. Isla markiiba Libaax baa u jawaabey oo yidhi:

Galow Geed ku jira mooyee
Geed xabag ka gura mooyee
Oo guda madow mooyee
Galow geel leh lama arag

Libaaxii ayaa heestii weli sii watay isagoo markaas Dayo la hadlaaya:

Naa kaymahaan inoo geli
Oo korocada saraareed baan
Maqaar-Saarka kaga degi
Miid iyo baruurtoodaad
Marba malabsan doonta ee
Dayooy mayla dadab geleysa

Dabeeto Weerihii ayaa heestii qabsaday oo yidhi:

Naa magacaygu waa weeroo
Soddon iyo siddeetan laxaad
Ayaan habeen meel ku wada dili
Mayla dadab geleysa

Xoorkii ayaa isna halkan ka soo booday oo yidhi:

Naa dudumooyinkaan geli
Dhuusaan ku bow siin

Malab baad ka tawtabin
Ee Dayooy mayla dadab geleysa

Ka bacdi Waraabihii oo ka xumaa heesta looga horreeyey ayaa isna yidhi:

Naa Cumaroo duudcarro leh sida
Iyo Dayo oo baraar layn
Waa isla doonasho illaah
Ee Dayooy mayla dadab geleysa

Aakhirkiina, dabagaallihii oo isagu maqlaayey wixii meesha ka dhacay, kana welwelsanaa in cidla' lagaga tegay ayaa sidan u heesay:

Naa Anigaa gu' iyo jiilaal
Aan Safarkaygu kala go'in
Geellaygu gamashiyin
Boqol deyrta dhalayaan
Boqolna baar madow yahay
Oo umushaydu gaajoon
Ee Dayooy mayla dadab geleysa

Markii heesahaas la is dhaafsaday oo Dayo laga eegaayey inay raacdo Libaax ama ragga kale ee Waraabuhu ka midka ahaa ayey Dacawadii heestii qabsatay oo tidhi, iyadoo la dhacsan Dabagalle:

Dabagaalle qoodheedow
Qumanow qardhaaso caddow
Adigaan ku qaayibay
Oo adigaan kuu dadab gelaayaa

Inankii Libaax ayaa cadho is-hayn waayey Markaasuu dhirbaaxo qaaday oo is-yidhi Dabagaalle dhulka ku baabi'i, hase yeeshee, nasiib wanaag waa la waayey oo Dagagaalla cagaha wax ka dayey oo godkiisii galay. Habardugaaggii kale ee ciyaarta isugu soo ururayna way kala yaaceen ka dib markii uu fadqalalahaasi dhacay oo uu weliba macsharkii Libaax ugu dhaartay in uu dili doono nin allaale ninkii is yidhaahda Dayo Guurso.

Sidaas ayey inantii Dayo ku guur beeshay. Inkasta oo ay u qushuucday inankii Dabagaalle haddana nasiib-darro waxa ay labadooduba ka baqaan Libaax oo si tuugo ah mooyaane caddaan isuma arkaan. Xitaa maanta haddii aad si lama filaan ah meel kaga soo baxdid iyagoo wada jooga waa ay kala ordaan iyagoo ku moodaaya Libaaxii.

## YOONIS TUUG



Yoonis Tuug wuxuu ahaa nin tuug ah. Hase ahaate muu ahayn tuug wax soo dhaca oo wax xada ee waxa uu ahaa tuug dadka waxooda ka khiyaanaysta, oo qofka inta uu soof daran habaabiyo, dabeedna dhaca.

Yoonis waxa uu dhalay afar wiil oo la qadhaaban jiray oo la kala odhan jiray Alamsay, Jurguxsay, Jaqafsay iyo Milikhsay. Isaga iyo wiilashiisu

waxa ay iskula hadli jireen heeso. Beri baa ay reer u soo cayaargudeen, waxana ay damceen in ay reerkaas isaga ah xadaan. Dhallinyaradii reer-ka iyo Yoonis iyo wiilashiisii ayaa dhaanto duleed-ka ka qabsaday. Yoonis baa ku dhuftay waxana uu yidhi:

Laba jir waa leg iyo badhi
Saddex jir waa siniin raac
Afar jir waa afadii deeq

Shan jir waa sheekadii daa
Laxda dharan ha dhaafina
Xagga bari ka laba gura oo
Habarbay iska howhowle heelada
inoo tuma

Heestan waxa uu Yoonis ku tilmaamayay reer-ka adhigiisa oo uu lahaa midna ha dhaafina ee mid walba soo xada. Intii cayaartu ay socotay ayaa Miliqsay iyo Jaqfasay reerkii xadeen. Yoonis iyo labadii kalena cayaarta ayey ku maaweelinayeen

Xoolaha cidina may ilaalineyn waayo dhallin-tii oo dhami cayaartay maan raaceen, markii ha-barta reerka u weyni tidhaahdo, «Hoogey maxaa xerada ka sanqadhayana?», Yoonisbaa ku luuqee-yay «habarbay iska howhowlee heelada inoo tuma». Kolkaas ayey iyana ilayn waa dhallinyaro cayaa-ri imaan qaadaye ku jiibiyaan «Waar heelada inoo tuma». Halkaas ayaa ilma yoonis adhigii intii ka dhaqaaqaysey ay ku xadeen. Dadkuna waxa ay moodi jireen in ay iska heesayan ee ma ay moodi

jirin in ay tuugada ay soo xadeen iska waraysanayaan.

Maalintii dambe ayaa uu Yoonis arkay Milikhsay iyo Jurguxsay oo soo soc'da. Yoonis Geel buu rag kale la waraabinayay. Inta uu wadaanti cirka ka keenay, ayuu dhaanto ku dhuuftay oo wiilashii ku yidhi waar kaalaya heesa ama ii jiibiya. Heestan bay isku celiyeen.

Yoonis: Labadii tukow waar maxaa wadeen?
Wiilashii: Laba totitahar
Yoonis: Oo xaggee dhigteen?
Wiilashii: Taaladatan dhow
Yoonis: Soo haad cune
Wiilashii: Waa hoosinaa
Yoonis: Soo hululecee
Wiilashii: Waa haawisna

Sida heesta ka muuqata way isafgarteen. Laba qaalin ayaan soo xadnay; nagana qudhmimaayaan; haadna nago cuni maayo ayaa la isugu hees celiyay.

Maalina waxa tashaday Yoonis iyo naagtiisii oo la odhan jiray Liqdo-Dhuunraacdo-Dhakam! Yoonis baa ogaaday in reerka deriska ay yihiin qumbe subag ihi u yaalo. Liqdo ayaa uu ku yidhi «Naa waan ku dilaayaaye carar oo reerka raarkiisa gundhada jar. Dabadeed qumbaha inoo soo shub».

Budh buu qaaday oo Liqdo aya uu eryaday. Gurigii

reerka ayey jaf tidhi. Markaa ayaa naagtii guriga lahayd tidhi, «Waar Eebbe ka cabso. Waar qofta haygu dilin. Waar gurigayga dhiig ha ku daadinin.» Markii ay Liqdo istidhi subagii shubo ayaa ay aragtay in uu codcod yahay oo aanu shubmayn. Kolkaas ayay tidhi inta ay sidii wax caayaya iska dhigtay.

«Waar Yoonis codcod ina ciidoode». Waxaayna u jeeday subagu waa codcod. Naagtii guriga lahayd, markaas ayey tidhi, «Naa wax xun ala kugu ridye ninka ha caayin». Markaas ayaa Yoonisna yidhi, «Naa ruxrux ina raxaan-shubta oo Ruuxaaba la cadaabye».

Naagtii guriga lahayd ayaa inta ay qayayaabtay tidhi, «Alla Yoonis adigu ka roonow. Maxaad hooyadeed u caayi.» Naagtii guriga lahayd ma ay garan khiyaanada weynayd ee Yoonis iyo Liqdo. Yoonis ma uu caayine waxa uu u jeeday, «qumbaha ruxrux oo subaga soo shub».

Sidaa ayey naagti subagii kaga xadeen. Soddohdii baa caano gadhoodh ah siiyay. Kolkaasuu damcay in uu wada laasto oo aanu u hambayn. Markaasuu inta uu sheeko ku wareeriyay baa uu yidhi.

«Soddohey waa nala gilgilay
Oo nala gilgilay
Oo nala gundhabay
Oo sida caanaha nala fuuqsaday»

Kolkaas ayaa uu heensaday kabbadii ugu dam-

beysay oo uu iska tegay. Maalina waxa uu arkay oday da' ah oo qumbe subag aha iyo wan wata. Markaas ayaa inta uu wax indha la' iska dhigay buu yidhi, «Waar yaahee, waar nin Islaam ah ma tahay? Waar qaar aan dhalay oo habaar qaba ayaa meesha igaga guuray. Waar aan wanka kuu taxaabe usha ii qabo».

Odaygii baa dareen naxariiseed galay oo isyidhi allaylehe kan ka ajarso. Waxa ay wada socdeenba, mar dhexe ayaa Yoonis, oo Miliqsay ku ogaa xidh halkan ah, wankii sii daayay. Markii uu hubsaday in wiilkiisii wankii la jiciirtay ayuu yidhi, «waar ba'a ,igawala wankii mahayo». Odaygii ayaa naxay, markii uu Yoonis yidhi, «Alla gacantay go'day. Waar aan qumbaha wadada la fadhiistee orod wankii baadidoon, illayn anigu wax arki maaye».

Markii uu odaygii dhaqaaqay ayaa uu qumbihii la big yidhi. Maalintii dambe ayaa beeshii tashatay. Waxa la isku raacay in Yoonis la iska qabto. Markii uu Yoonis taa ogaaday ayuu isna tashaday inta uu yidhi «Tab hayaw lagaa tab hayee.» Laba wiil oo uu dhalay ayaa uu ku yidhi, «Waar berrito waa la i taxaabayaa ee geedka lagu shirayo fiiqa u sarreeya sii kora.» Marka la i keenana waxa ku dhawaaqdaan, «Cirkow maqal Yoonis waa weli». Laba wiilna meel dhulka aha inta uu ku qariyay buu yidhi dhaha «Dhulow dhiiga Yoonis diid, waa weli». Nin uu wax yara siin jirayna waa uu balamiyay oo waxa uu yidhi waxa aad tidhaahdaa, «Waar weligan inaga daaya». Markii la keenay

Geedkii ayaa cirka iyo dhulkii isu dayaaineen. Markaasaa kuu balansadayna yidhi, «Waar yaan layna rogin ee inaga daaya». Dadkii waa ay yaabeen oo waxa ay yidhaahdeen, «Malaha wax baa la inagu tusayaa ee inaga daaya».

Hase ahaatee carruurtii beesha oo dhami waxa ay ugu heesi jireen:

«Yoonis Tuug, lagu turturuq. Tuugii baxanow lagu Turturuq».

# DHEG-DHEER



Waayo hore waxa jirtay naag dadqalato ah. Naagta waxa lagu magacaabi jiray Dheg-dheer. Waxa ay magacaa ku mutaysatay labadeeda dhegood ayaa midi aad uga dheerayd ta kale. Haddii ay seexato dhegtu hoos ayey u dhici jirtay; haddii ay soo jeeddana waa ay lulan jirtay. Dadqalatadaasu waxa ay ku noolayd agagaarka boholaha la yidhaahdo Xergega[1]; waxana ay lahayd gabadh aad u qurux badan. Waagu marka uu beryo ayey Dheg-dheer dad-ugaadhsi u bixi jirtay; gabadhana guriga ayey ku dhaafi jirtay si ay guriga u ilaaliso. Guriga Dheg-dheer waxa yiil laba haamood oo waaweyn. Mid waxa la odhan jiray Baw-dheer. Baw-dheer waxa ay Dheg-dheer ku ridan jirtay dhiigga iyo hilibka dadka; qof kale haddii uu isku dayo inuu bujiyo waxa ay haantu odhan jirtay «Bow». Dheg-dheer meel kasta ha joogto e waa ay maqli jirtay.

---

1. *Waxa ay ku yaqliin degmada Laascaanood, Nugaal.*

Markaas ayey iman jirtay iyada oo lalaysa oo leh, «Ba'ye, mą bow-dheer baa la furay, ma xaynkaygaa bug yidhi». Qofkii ay qabato goobtana, kolkiiba inta ay laba ka kala dhigto ayay jurgux ka siin jirtay.

Dheg-dheer, haanta labaad waxa ay ku shuban jirtay biyaha. Dheg-dheer aad bay u dheerayn jirtay, oo dadka oo idil wax la orod ahi ma jirin. Qof kasta oo ay eryatona intaa aanu geedkaa gaadhin ayey tudh siin jirtay.

Hase ahaatee, waxa ay ka baqan jirtay boholaha Xergega. Berigii dambe ayaa la bartay oo qofkii ay eryataaba waxa uu u carari jiray Boholaha Xergega; markaas ayey faraha ka qaadi jirtay.

Maalin malmaha ka mid ah ayaa ay naag shilis oo wiil yar xambaarsani soo martay jidkii ay Dheg-dheer wax ka ugaadhsanaysay. Markii ay Dheg-dheer naagtii aragtay, ayey cagta cagta u saartay. Naagtii baa orod isa sii daysay oo u carartay xagga Boholaha Xergega. Dheg-dheer baa intay cadhootay, calaacashay oo tidhi:

Hoh iyo boholaha Xergega
Nin duulaayay dabraan
Nin xiimaayay xidhaan
Bal naagtaa badhida daya
Bal balaqbalaqdeeda daya
Bal bowdyo caddaanta daya
Bal wiilkay sidato daya.

Dharaartii dambe ayaa gabadhii ina Dheg-dheer laba hablood oo iyada la da' ihi soo booq-

deen; kolkaas ayey yidhaahdeen, «Walaalshay na waraabi». Ina Dheg-dheer hablihii waa ay soo dhoweesay iyada oo wejigeeda qulub ku dheehan yahay. Hablahii ayaa ku yidhi, «Maxaa dhacay? Miyaad naga arag naxaysaa?» Ina Dheg-dheer baa ugu jawaabtay «Maya, laakiin hooyaday ayaa dad-qalato ah oo marka ay timaado idin muqmadaynaysa». Ina Dheg-dheer hablihii waa ay waraabisay, hilibna waa ay siisay.

Markii hablihii ay maqleen dad-qalato ayaa ay yidhaahdeen, «Oo hilibkaad na siisay tolow muxuu ahaa?» Ina Dheg-dheer ayaa ugu jawaabtay «Wuxuu ahaa gabadh sagaal jira leggeed iyo badhideed». Hablihii baa yidhi, «Hoognay, ma hilib dad baanu cunay»? (wax hunqaaco la yidhaahdo ayay hablahii isla rogeen).

Ina Dheg-dheer baa Eebahay amakaak iyo yaab u keenay, oo waxa ay tidhi, «Maxaa kale ee la cunaa?».

Hablihii: «Oon xoolaad, cad iyo caano».

Ina Dheg-dheer: «Gartay, idina xaggaa ka timaadeen».

Hablihii: Adoogayagii baa naga dhuuntay».

Ina Dheg-dheer: «Waayo?»

Hablihii: «Waa sabool, ragna ma leh, gabadhona kow iyo toban ayaannu nahay. Hooyadayona waa ay dhimatay; waxa uu noo taagana ma hayo. Kolkaa, shalay ayaa uu na yidhi, «Idinku like i noo qoda, anna awrka ayaan xidhkan daajinayaa».

Markii ay qorraxdii gaabatay ee aannu isnidhi carraaba, ayaa aanu aragnay koortii awrka oo geed sudhan oo sanqadhaysa, odaygiina naga baxsaday. Sidaanu u daalaa-dhacaynay ayaannu aqalkiina aragnay». Ina Dheg-dheer: «Alla maxaa waalid daallin iyo dad-qal ka dhigay!».

Markaas ayey ina Dheg-dheer hablihii harrar ku duubtay, waayo Dheg-dheer ayaa soo dhoweyd. Wax yar dabadeed xiinkii Dheg-dheer baa jowdiisii soo yeedhay, saa waa tii oo wiil toban jir ah oo sirirsan lalminaysa. Judhay aqalkii soo gashay ayey sanka la raacday oo waxay ay tidhi: «Oo, oo, naasa hablood baa ii uraya». Markaas ayey gabadhi tidhi: «Ha u hunguroone, ee wiilka dhiiga ka hoori».

Dheg-dheer markaas ayey yara lamandoodsatay. Gabadhii wiilkii ayay solay iyo saaf ka dhigtay. Goor dhow baa ay Dheg-dheer toostay. Cad baruurle ayaa ay la booday, miiddi baa qawlalada ka dareetay. Markaas ayey kalax dhiig ah isku dhufatay, oo ay tidhi: «Eebbow adaa na siiyay ee noo siyaadi. Wixii naga qaadanna qaska ka wareen».

Kolkaas ayey inta ay foof u diyaargarooday waxa ay ku tidhi inanteedii, «Hooyo, bal waan gabraar tegayaaye guriga sii ilaali, oo inan rag tobana i suma raaco sagaalna ka adkide, waa ku kaa». Markaas ayey inta ay dhegteedii dheerayd cirka u mudh siisay ay tidhi: «YUF YUF YUF». Kolkii ay Dheg-dheer baxday aya ay hablihii soo baxeen iyaka oo argagaxsan. Hablihii waxa ay ku tasha-

deen in ay ka firdhadaan guriga dad-qalatada. Ina Dheg-dheer ayaa ay ku yidhaahdeen: «Naa maxaa khiikh leh»? Kolkaas ayey ugu jawaabtay: «Oday baa naf aanu helayn u hantaatacaya». Saa waa ay fiiriyeen, saa oday naftu iska gurayso oo la gawracay ayaa yaal. Hablihii Ina Dheg-dheer waa ay waaniyeen. Waxa ay tusaaleeyeen in hooyadeed dad-qalato tahay, waajibna ay ku tahay in dadka ay ka qabato. Gabadhii way fekertay waxana ay tidhi: «Waa hagaage ila dila», Hablihii: «Weger! yaa dili kara Dheg-dheer»?. Ina Dheg-dheer baa ugu jawaabtay: «Taasu waa ay fududahay; marka ay seexato ee dhegta dheer ay baldhaq ka siiso, haddii aynu dhegta maroojino waa ay asqoobaysaa, waxbana kala garanmayso: waxna arkimayso. Qayluun bay ku yotosanaysaa; kolkaa midina dhegta ha maroojiso, labana maddanayaal caddaaday ha xurbiyeen».

Sidii ayaa ay yeeleen. Markii xanuunkii ka fara batay ayay qaylo kaga toshay, oo xaadirisay dad aan la garaneyn oo jin oo jaan ah, oo waxa ay tidhi: «Dhumbaaqshow, Dhaqarrow, Xintiraw, Dhakookilow, Ciidanshay». Sidii ay waxa u shubaysay ayey naftii ka baxday. Kolkaasaa cirkii isqabsaday, hilaacii galacleeyay oo onkodku isu baxay, gabdhihiina cayaar qabsadeen oo ku dhaanteeyeen:

Dheg-dheer dhimatoo dhulkii nabadeey
Jig-jiga roob baa ka da'ayeey
Dheg-dheer dhimatoo dhulkii nabadeey
Jig-jiga roob baa ka da'ayeey.

## WIIL-WAAL IYO WIILKII UU ABTIGA U AHAA

Wiilwaal oo ka mid ahaa ragga murtida ku caan noqday ayaa maalin lagu yidhi, «walaashaa wiil nacas ah ayey dhashay». Wiilwaal inta uu madaxa ruxay ayuu yidhi: «Haa, bal ha qaangaadho». Waxa uu dhawroba markii uu wiilkii hano qaad noqday, ayaa Wiilwaal geenyadiisii heensaystay, billaawena soo qaatay oo yidhi, «Aniga nacas kolba i odhan maayo 'Abti' ee billaawahaas ayaan qudha kaga goynayaa».

Maalintii dambe ayaa Wiilwaal ku soo baxay wiilkii oo isna faras ku taagan. Aad isumay garanayn, hase ahaatee wiilkii ayaa masanuuniyay oo yidhi, «Abti ma nabad baa». Kolkaas ayaa Wiilwaal inta uu giir iska kiciyay yidhi «Waar abtigaaga mooyaan ee ii warran».

Xoolo maxaad ka timi?
Xaragana maxaad ka timi?
Xulquun maxaad ka timi?
Xaasna maxaad ka timi?
Xilana maxaad ka timi?

Markaas ayaa wiilkii inta uu madaxa ruxay yidhi: «Haa waan gartay».

Xoolo laba boqol oo halaad baan ka imi
Xarragana hal faras oo qaayo leh baan ka imi
Xulqun laba tiro oo ido ah baan ka imi


Xaasna laba tiro oo riya ah baan ka imi
Xilana aniyo xididkay oo wada niil.

Wiilwaal baa intuu dhoosha ka qoslay yidhi, «Waar ba'a, nacas ka dheerid». Geel xoolo waa yahay, ama duul ku qari ama duud ku qari. Far-dana xarrago waa yihiine, ama ku joog, ama ka joog; Idona xulquun waa yihiine, dayr dhalka ka ogow, dooxana la ogow; Riyona xaas waa yihiine laba dixood ku dhex fur; mid ay ka foofaan iyo mid ay ka soo hoydaan. «Halkaa haynoo joogto nabad gelyo», ayuu yidhi Wiilwaal. Sheekadaasu waxa ay ina xusuusinaysa maahmaah ah: «War indhaa dhaama».

---


F.G. : *Wiilwaal magaciisa waxa la odhan jiray Garaad Xirsi Garaad Faarax Garaad Xirsi.*

## DACAWO SOCODKEEDIINA KA TAGTAY KII NEBIGANA GAADHI WEYDAY




Dawacadu berigii hore sida habardugaagga kale ayey u socon jirtey. Iyada oo socodkeeda ka raalli ah oo ku niyad san ayaa maalintii dambe waxa ay aragtay Nebigii oo soconaya. Markaas ayaa ay tidhi: «Ba'aa maan aniguna tallaabada quruxda san kaga daydo Nebiga». Hase yeeshee dacawo waxa ku dhacay guuldarro weyn; taas oo ah in ay socodkeediina ka tagtay kii Nebigana keeni kari weydey. Markaas socodkeedii inta uu aad u fool xumaaday, ayaa ay iminka u socotaa «Dhohdhoh» oo habardugaagga kale oo dhami ay ku qoslaan.

# MADAX-KUTI



Beri fog waxa jirtay dhulkeenna bahal la odhan jiray madax-kuti, waxana ay u ekeyd dhidarka, dad-cunna waa ay ahayd. Bahashaasu waa ay hadli tiqiin. Hase yeeshee, waa ay carrab la'ayd. Laakiin Carruurta oo dhanna magacyadooda ayaa ay tiqiin. Markaa guriga docdiisa inta ay isku niibiso, ayaa ay odhan jirtay, «Waar hebel, hoo fuudkan iyo misiririgtan». Qofkii aan u fiirsan erayga «misigtan» in aanay si qumman u odhan karayn, intuu fakh yiraahdo, ayuu dibedda u bixi jiray.



Markaas ayaa inta ay afka afka u geliso, alam ka siin jirtay. Habeenkii dambe ayaa markii xoo-

lihii la soo hooyay ayey habari madigeedii weyday. Waxa ay rooroortaba, waxa loo sheegay in wiilkii Higis ahaa hali jebisay oo dabadeed geed higla ah la saaray, qaydkiisiina la yidhi hayso oo haddii ay madax-kuti kuu timaado, inta aad qaydka u soo lalmisid, marka ay qabsato u sii daa ha dhacado hanaquba halkaa ha ku go'o.

Iiayn waa hooyo e, markaas ayaa habartii ay cuskatay baroor «Hoogay hal baa jebisay. Hoogay higlaa la saaray, (Waar Higisow)». Waxa ay habartii baroortaba waxay ay maqashay cod leh, «hooyo, hooyo». Markaas ayey orod afarta jiho hadba mid is dhigtay. Waxa ay kacaa bablaysaba, waxa ay ku soo baxday wiilkeedii oo geedkii saaran iyo madax-kutidii oo geedka hoostiisa taal oo bakhti ah. Markaasa ayaa inta ay cayaar iyo mashxarad qabsatay tidhi: «Eebihii aan i goblamin baa gallad iyo mahad leh».

## CARRUUR IYO REER-GUURAA-RAAC



Carruurta Soomaaliyeed berigii hore marka la cabsiinayo waxa lagu cabsiin jiray, «Waxa ku cuni doona reer-guura-raac, haddii aad wax maqli weydid». Soomaalidu waxa la sheego ee aan la arkin, waxa ay ugu maahmaahaan: «Carruur iyo reer-guuralraac ba wax baa laysaga sheegaa ismase arkaan».



# MAXAA LUGTA DHURWAAGA GAABIYEY



Waxa la yidhi markii dunida la uumay, ayaa habar-dad iyo habar-dugaag oo idil la tartansii-yay. Dhurwaabaa ugu dheereeyey. Markaasaa intii kale oo dhammi yaayuushtay oo yidhaahdeen, «Kanu waxba naga reebimaayo.» Kolkaas Eebbe makhluuqaadkii il naxariiseed ku eegay, oo dhur-waagii lug calaan laga dhigay.

Welise xoolaha dab-joogta ah, nafta ayuu ku dhibay, waxana la yidhaahdaa, «Waraabuhu waxba inaga ma reebeen ee talo xumida ayaa lagaga la-dan yahay». Waayo Soomaalidu waxa ay u ya-qàaniin in waraabe uu doqon yahay.

# AWRKA CIRKA



Waxa jiray baa la yidhi awr la yidhaahdo awrka cirka; waxana uu ku hoolaa buur bariga dhulkeenna ah oo la yidhaahdo Cirshiida. Waagii dambe ayaa abaar xumi dhacday. Markaasaa dadkii tashadeen oo waxa lagu guddoomiyay in awrka cirka cid loo dirto. Raar ayaa ay dadkii dhiseen, dhiseen oo waxa ay ku shareereen cirka. Waxa ay wadaanba, raarkii baa ninba nin isku kor taagay. Labadii nin ee ugu koreeyey, ayaa midna faruuryaha awrkii la booday, midna dabada haleelay.

Markii ay hubsadeen in awrka gacan buuxda ay ku hayaan, ayuu kii faruuryaha hayay yidhi, «Waar saabkaygii ma la hayaa?». Markaas ayey yidhaahdeen «Maya». Kolkaas ayaa uu inta uu cadho jiq iska siiyay, faruuryihii awrka sii daayay.


Kii dabada hayay markii uu arkay in Jaallihiis uu sii daayay faruuryihii, ayuu isna dabadii awrka soo dhuftay. Kolkaas ayey u soo ruqday. Markaasaa awrkii oo daba la'i baydaday, oo orodkii waxa uu ku tegay koonfur gunteed. Hadda awrkii waa kaa cirka xaggiisa koonfureed ka muuqda isaga oo daboole ah.

# WAXII AAN DAACAD AHAYNI DABADAY KA XUMAADAAN



Beri waxa hal wada halaa dawaco khiyaano, Mas, Dab, Libaax iyo bakayle-daacad iyo daad. Dacawada marka la yidhaahdo: «Naaya, dayo, hasha ceel gee ha soo cabtee», waxa ay tidhaahdaa: «Weger waaba ceel dheer tag oo col ha ku dilo. Anigu guriga ayaan sii ilaalinayaa cid kale ceelalyo ha noqoto». Goor fiida ayaa Maskii la faqaday oo waxa ay ku tidhi: «Waaryaa Mas, Libaax waxba inaga reebimaayo e maad inaga qabatid?».





Mas: «Sidee libaax loo qaban-karaa?». Dawaco: «Caawa qaniin dabadeedna muska xuluulo». Ilayn waa doqon la diraye, libaaxii buu qaniinyo kadh kaga siiyay. Libaaxiina dhulkaba ulama dhicin, e kow bay ka tidhi. Maskii, ilayn waa nin dhiig qabaye, waa uu soo bixi waayay.




Maalintii dambe bay u yeedhay dabkii oo waxa ay ku tidhi, «Waryaa dabow maad maska inaga qabatid?». Dab: «Sidee baan inooga qabtaa?». Dawaco: «Gub maska iyo muskaba».

Sidii ay tidhi ayaa uu isna ku dhaqaaqay. Maalintii dambe ayey dawacaddii u yeedhay daadkii oo waxay ku tidhi: «Waaryaa dabka inaga bakhtii, roobka da'ya baa ku badin doone.» Dabkii baa isna halkaas ku dabar go'ay.

Bakayle-daacad oo yaabsan baa maalintii dambe yidhi, «Naaya dayo kaalay hasha ila maal». Dacawadii baa hasha candhadeedii xoor marisay oo waxa ay bakaylihi ku tidhi: «Waaryaa, bakayle xoorka soo leef». Waxana ay islahyad hashu harraati ha ku qaaddo oo hanaqu ha go'o oo aad adigu keligaa u hadhid. Ilayn waa bakayle-daacad oo Eebbana la jiree waa uu gartay. Markaas ayey istidhi si shakigu uga baxo adigu si miyir ah u leef. Markii ay balow soo tidhi, ayey hashii harraati qaadday oo adhaxda ku dhufatay. Halkaas ayaa dawaco ku dhimatay bakayle-dacaadna hashii ugu hadhay.

## KABA-CALAF IYO HURYO UGAAS



Huryo Ugaas waxa ay ahayd gabadh qurux iyo qiimiba leh. Nin kasta oo guurdoon ihina waa uu hilaadin jiray. Maalintii dambe ayaa wiil doob ahaa oo la odhan jiray Xirsi uu ku tashaday in uu Huryo guursado oo la tago. Kolkaas waxa uu soo kaxaystay ina-adeerkiis oo la odhan jiray Kaba-calaf. Kaba-calaf nin aftahamo leh oo, haasaawaha belo ku qaba ayaa uu ahaa.

Markii Huryo iyo Xirsi ay heshiiyeen ayaa socdaalkii la bilaabay. Waxa ay toobiyaha hayaanba, aroortii dambe ayaa ay geed damal ah hadh galeen. Markii hal rabbac ah ay fadhiyeen, ayey Huryo tidhi: «Waar aan nasano». Xirsi baa Ilaahay yaab u keenay oo waxa u yidhi, «Naftu kaa baxday sow tan aynu nasanayno». Kaba-calaf baa yidhi: «Waar waxa ay u jeeddaa aan kabaha la baxno».

Cabbaar haddii ay meeshii sii joogeen ayey Huryo tidhi: «Allaa igu og meesha waa la yaalaa».

Xirsi baa amankaagay oo yidhi: «Waa ba cidla ciirsi la' meeshu oo dad iyo xoola toona ma joogaan». Kaba-calaf: «Malaha xuunsho ayay aragtay.» Iyada oo tii hore Xirsi la yaabsan yahay, Kaba-calafna dhoosha ka qoslaayo ayey haddana tidhi: «Oo maad luunka inaga goysaan». «Wax ha cunin,» baa Xirsi yidhi, «Oo ma saad baad inoo wadday.

Kaba-calaf baa tiraabay oo waxa uu yidhi: «Waar ba'a, waxay ina leedahay cadayo inoo soo gooya». Huryo inta ay yaabtay ayaa ay tidhi: «Oo Xirsi ma ogid miyaa in anfaca caday ugu horreeyo?». Waa la kacay, kabiina waa la gashaday; socdaalkiina waa la waday. Intaa Huryo waa ay fekeraysay, talana waa ay ku baahday. Markii la guuryo tegay ayaa ay tidhi: «Duqaytida reerka baan rabaa in aan shir la qaato.» Markii raggii yimaadeen ayaa ay ku tidhi: «Akhyaar yahay waxaan idiin dooransiinayaa laba arrimood. Waa mida hore waxaan goostay in Kaba-calaf aad ii dhistaan; waa ta labadee, haddii aanay suurogal ahayn reerkayagii igu cesha. Waxa kale oo ay ku dartay Huryo, «Xirsi runtii ma aha liid» dumarkuse saha duwan ayay leeyihiin. Anigana; sahaygu waxa uu la jira Kaba-calaf».

Ergadii arrintii waa ay la cuslaatay. Waxa ay isku noq-noqdaanba, waxa la gooyay in aan inanta reerkoodii lagu celin, lana muquunin. Xirsi oo isaguba ahaa wiil wax garad ah waxa uu goostay in aanay Huryo oo kale oridiisa noqon karin. Xir-

si waxa uu aqoonsaday in qiimaha dumarku kala nooc yahay, Huryona aanay tiisii ahaan karayn.

Kolkaasaa Huryo iyo Kaba-calaf la isugu duceeyay. Kolkaas ayaa Kaba-calafna geenyadiisii Xirsi xaal u siiyay.



# ISHA CALI KA LULATA

Habardugaag oo idil ayaa beri libaax shir u qabtay. Shirkii markii ay isugu yimaadeen ayaa uu libaax yidhi, «Aniga oo odaygii ah waxaan maanta rabaa in hashii aynu ugaadhsanay hilibkeedii si aad u xaqa-siiran ah aynu u qaybsanno». Kolkaas ayey yidhaahdeen, «Adaanu kugu kalsoonnahaye inoo qaybi». «Maya» buu yidhi. Markaasaa dhurwaa ba loo magacaabay inu qaybiyaha noqdo.

Dhurwaa baa inta uu isa soo dardarciyay yidhi, «Hasha ma badh, mise badh; badh libaax baa leh, badhka kalena habardugaag oo idil baa leh». Libaaxii baa inta uu cadho ismaray, dhirbaaxo isla kala jiiday oo dhurwaa il kaga soo tuuray, oo yidhi «Waar waxu qayb xumaa!».

Dhurwaagii baa oohin cuskaday oo gees u luuday. Libaaxii inta uu giir iska kicyay ayaa uu yidhi, «Naayaa Dayo adigu hilibka qaybi».

Markaas ayey tidhi: «Boqor maad iga deysid». Libaax baa madaxa ruxay, kolkaas ayaa ay tidhi: «Hasha ma badh mise badh, badh Libaax baa leh, badhka kalena ma waax, mise waax, waax libaax baa leh, waaxda kale ma falladh, mise falladh, falladh libaaxbaa leh, falladhaka ma rimic mise rimic, rimic libaax baa leh, rimica ma miil mise miil; miil libaax baa leh, miilka soo hadhay habardugaag oo idil ayaa iska leh oo aan midna ka kale waxba dheereysaneyn ee ha isku fuulfuuleen».

Libaax baa inta uu qosol qumurushka dhigay yidhi, «Naaya dayo yaa qayb wanaagga ku baray?». Markaas ayey tidhi: «Isha Cali ka lulata».

# ROOBOW



Roobow ruglow kaalay,
Riya darariyow kaalay;
Ceesaama giirgiiran,
oo dhagax ku wada jooga,
Geeskooda ka xumbeeye;
ka xumbeeye ka xareerdshe

Heestan oo kale waxa ay carruurtu ku hee-saan marka roobku da'o. Inta ay sare u boodboo-daan ayey ku luuqeeyaan.

# UURAY



Uuray Uuray,
Agaan biijo,
Saab la aroora,
Sina ceel geeya.

Heestanu waa majaajilo, oo carruurtu waxa ay ku heesaan markay dumarka uurka leh xifaalaynayaan.


# AF DALOOL



Af dalool darayo,
Afka xaar ku side,
Afadii aragtaay,
Afka xaar ugu rid.

Carruurtu heestan waxa ay ku xifaaleeyaan ilmaha ilka dhacsada.

# NAA HOOY DAYO



Naa hooy dayow heedhe,
Dayo waalan ay heedhe;
Waa lay dilaayaaye,
Waa lay dabaayaaye.

Heestan carruurtu waxa ay ku heesaan marka maqasha loo diro. Dayo waa magaca dawacada. Soomaalidu habardugaagga oo dhan magacayo ayey u bixiyaan. Carruurtu waxay og yihiin in la dili doono haddii neef bahal ka cunno.




# TUUGOW



Tuugow mareegaale,
Adigoo laxdii daylo,
Dabadeeda gaadaya,
Qoodhaha mas kaa goosay,
Oo qumayo kaa xagatay.


Habeenkii marka ay cawaynayaan ayay carruurtu, gaar ahaan habluhu, isku maaweelayaan oo ku soo jeedaan, tuuggana ku barawixiyaan.

# MULACOW




Mulacow hashi Mayay ma aragteen?
Maya ee maqarkii mow sidaan?
Nin yar oo nin weyn dilay ma aragteen?
Dabagaalle geel wada ma aragteen?
Kaba tole kureed le'eg ma aragteen?

Carruurtu inta ay meel sare koraan ayey ku heesaan tixdan, marka laba caruura la legdansiiyay, ayey ku xifaaleeyaan ka laga adkaado.



## WAXA GOORTA GUDAY



Waxa goorta guday waa garanayaa,
Waa garanayaa waa rag iyo geel,
Waa garanayaa waa gabadha an curan,
Waa garanayaa, waa goon libaax,
Waa garanayaa waa geesi wiil,
Waa garanayaa waa gaari wacan.

Heestan waxa lagu heesa marka la guuro ee carruurta la yidhaahdo maqsha soo wada. Waxa halka ka muuqata in la tilmaamayo inta reerka ugu adadag oo la garowsan yahay in ragga iyo geela, geenya ugub iyo gabadh aan curan, libaax iyo wiilka geesiga ah iyo gaariduba ay u babac dhigi karaan guuraha habeenkii.

# AABBO IYO HOOYO



Aabbo iyo Hooyo,
Maanta adhiggeena,
Waxaan la soo joogay,
Buulashii goroyo,
Iyo bankii galayax.
Waxaan ka soo qaaday,
Laba qunbo oo subag ah,
Waxaan ka soo qaaday,
Labo qunbo oo malab ah.
Waxaan isaga dhiibay
Inan yar oo uur leh,
Oo abaal igu leh,
Oo allahayow leh.
Waxay isaga dhiibtay,
Laba tuke oo safar ah,
Oo socdaal dheer ah,
Oo sin bari aaday.

Carruurtu inta ay geed dheer u baxaan marka adhiga la raacsho ayay heestan oo kale isku maaweeliyaan.

# ALŁA DHEERIYA



lla dheeriyaa!
)o dheeriyaa,
Oo dhuxusha ka madoobiyaa.
Aabahay baan arkaa!
Hal iyo Nirig buu wataa.
Hooyaday baan arkaa!
Lax iyo nayl bay wadaa.
Aabe nirigtuun i sii;

Marka roobku da'o ee dhulku barw... ...o ... do, Carruurtu inta ay isu boodo dhigtaan ayey heestana ku qaadaan. Ilmaha boodaya ayaa yidhaadha, «Alla dheeriyaa oo dhuxusha ka madoobiyaa». Ereyadaas ilmuhu waxa uu u leeyahay wuxu ku faanayaa dhererkiisa, dhumucdiisa iyo midabkiisa.

# WACAYS



Wacays baan soo sidaa.
Waa wiil!
Badheedhaan daba wadaa
Waa gabadh!
Ku dhalay; ku dhalay!

Tixdan carruurtu intay isdaba galaan ayay ku cel-celiyaan oo ay guriga arooska ah ku kor wareegaan. Tixdu waa saadaal fiican oo reerka arooska ah lagu farax gelinayo oo ubad loo saadaalinayo. Markaas, reerku carruurta waxay siiyaan timir, kolkaas ayey dadku yidhaahdaan «Saadin sama leh».

# AABAHAY



Aabahay maro iima goyn;
Hooyaday maro iima goyn.
Qayd sakaaro ay soo xadeen,
Bay igu xidheen.
Ay sikinix, ay sikinix!

Carruurtu intay gacmaha iswada qabsadaan oo ay wareeg samayaan ayaa ilmuhu heesaan oo marka uu sikinix yidhaahdo mid kale ka goostaa inta mid waliba kalkiisa qaato.

# MIIDO IYO MUUSE



Miidooy, xaggee baan soo maraa?
Muusow, muskaa soo jibaax.
Miidooy, bilaa qodaxi i muddaa.
Muusow, mindiil jeexdaan hayaa.
Miidooy, bilaa dhiigay dhul qabay.
Muusow, xareed maydhaan hayayaa.



Miidooy, bilaa qoyey oo qadh-qadhay.
Muusow, dabaan kuu belbelin.
Miidooy, billaa dab i diirin waa.
Muusow, boggaan boga kuugu qaban
Haddaan Hooyaa! Haddaan hooyaa!

Heestan marka habeenkii golaha la isugu yimaado ee la caweynayo ayaa carruurtu dhadig iyo lab isu hal ritaan.

# FARASKAYGA




Faraskayga bullaale,
Waa bullaale siciidoo,
Bari baan ku wadaa oo,
Biyo wayga walaahi.

Carruurtu inta ay laan koraan oo ay faras ka dhigtaan ayey ku luuqeeyaan heestan.



# DHURWAA ADHIGA EEBAA LEH



Dhurwaa adhiga Eebaa leh;
Eebe iyo ustaadkaa leh;
Oo niman dableeyaa leh;
Oo niman ku dili baa leh.
Gaaciye Maataan baa leh;
Niman reer garaadaa leh;
Cabdille oo suldaanaa leh.



Cabdi — galacyo — dheeraa leh.
Inantii casayd baa leh;
Cawralo ku diley baa leh;
Suuban aan samrayn baa leh;
Samawada oo ka daran baa leh.
Yaan gamas laguu qarine;
Goblamow iskaga roor dhe,
iskaga roor dhe.


Heestan waxa tiriyay Xuseen Dhiqle, carruurta ayaa adhiga marka ay illaalinayso isku maaweelisa, dhurwaagana ku bajisa.

## HAAWIYEE

Beri reerkaygu guur, — Haawiyee
Guuryo galbeed qabay. — »
Waxaraha wad la i yidhi, — »
Wadi maayo baan idhi. — »
Ma ahee, wad la i yidhi; — »
Ma wadaayo baan idhi. — »
Usha dhebi la ii qaad, — »
Iska soo wadaan waday, — »
Togga xagar ku soo rogay; — »
Tiriyoo tiraa maqan; — »
Tiro qoor cas baa maqan; — »
Togga hoos u habas idhi; — »
Doon-doonay oo helay; — »
Doobow, ayaad tahay? — »
Doob geesi oo geele. — »
Adiguna ayaad tahay? — »
Gaari guudka loo dabay. — »
May raaci buu yidhi? — »
Kuma raaco, raad raac. — »
Jeedal igu jabaan jabi, — »
Iska daba rakookibay, — »
Kabahayga iga qaad, — »
Kabihiisa ii dhiib! — »
Kabihiisa culusaa! — »
Kabahaygu fududaa! — »
Iska daba rakookibay; — »
Reerahoodii lay gee; — »
Aqalada la baal baal; — »
Buul buurta laga taag, — »
Laxda bilan la soo qabay, — »

| | | |
|---|---|---|
| Mindi lagu xangarafsii; | — | Haawiyee |
| Misig dhoor leh lay keen. | — | » |
| Rudhay oo halkeer dhigay, | — | » |
| Isna waa ka xila furay; | — | » |
| Ana weyga xaaraan. | — | » |
| Mid Allow calfaa cunay; | — | » |
| Doobi xoor leh lay keen; | — | » |
| Kabadoo halkeer dhigay; | — | » |
| Isna waa ka xila furay; | — | » |
| Ana weyga xaaraan. | — | » |
| Mid Allow calfaa cabbay. | — | » |
| Dawacaa nnashxarad timi! | — | » |
| Daayeer Riyaha raac! | — | » |

# DABA-HUWAN



Naa laago laago, — Daba-huwan
Waa laan galool ah; — » »
Aan weli la diiran; — » »
Ee may la diiran? — » »
Waxba diiran maayo. — » »
Anba wayska diiran. — » »
Oo maxaad ku diiran? — » »
Mindidayda daabcad. — » »
Daabka dillaaci! — » »
Gees goodirkayga. — » »
Geeska gammuurmi! — » »
Abtigay, Gaboobe, — » »
Yaan gudin u doonan. — » »
Oo xalayba guurye! — » »
Xamaraan u fuuli. — » »
Xamaraan dakaami! — » »
Xamaraw dirka be, — » »
Dib laguuma fuulo. — » »
Anigoo sidaas ah, — » »
Oo hawd u jeeda, — » »
Oo hoogayey leh, — » »
Oo hooyo baas leh, — » »
Yaan vuul arkooday! — » »
Buulkii huluushay, — » »
Oday baa doc jiifa; — » »
Habar baa doc jiifta; — » »
Inan baa doc jiifta; — » »






Dheri baa dab saaran; — Daba-huwan
Hilib baa ka buuxa; — » »
Legii baan la booday; — » »
Odaygii baygu booday; — » »
Naa maandhe, ii dhig; — » »
Inta kaleba qaado. — » »
Madax baan la boodey. — » »
Habartii baygu booday; — » »
Naa maandhe, ii dhig; — » »
Inta kaleba qaado. — » »
Misig baan la booday. — » »
Inankii baygu boodey. — » »
Naa maandhe, ii dhig; — » »
Inta kaleba qaado. — » »
Garab baan la boodey. — » »
Inankii baygu boodey. — » »
Naa maandhe, ii dhig; — » »
Inta kaleba qaado. — » »

Qoyskiin ba'baan idhi; — » »
Giddigoodba qaado — » »
Waan iskaga huleelay, — » »
Oo hawd u jeestay, — » »
Yay koori yeedhay; — » »

Koortiina ma hayo, — » »
Waa koorta geela. — » »
Waa geel darecray, — » »
Koran bow horreeya, — » »
Qaalin bow dhexeeya; — » »
Duq bow dambaysa; — » »
Miidaa la joogta; — » »
Korankii baan ku booday; — » »
Kuruskaan xafuujey; — » »
Miiddaa dareertay. — » »
Naa Miido, fuuqso. — » »
Waxba fuuqsan maayo! — » »
Amba wayska fuuqsan. — » »
Qaalintii baan ku booday, — » »
Candhadaan xafuujey; — » »
Caanaa dareeray, — » »
Naa Miido, fuuqso. — » »
Waxba fuuqsan maayo! — » »
Amba wayska fuuqsan. — » »
Duqdii baan ku boodey, — » »
Cududdaan baf siiyey; — » »
Dhuuxbaa dareeray. — » »
Naa Miido, fuuqso. — » »
Waxba fuuqsan maayo! — » »
Malaggaa gel, Miido! — » »
Miiday igu diiday! — » »

Heestan iyana waa kuwa habeenkii carruurtu ku caweyaan. Waxaana halkaa laga muujinayaa hal adeega dumarka.

# CARRAB JALQIN



1. Biciid barqo daaqay, jilbo baldhaq

2. Tuke tun rudh, rukin dable ku ruqu-ruqo, ruqsay

3. Sakaar siin waxar, sakow

4. Shanshow shidhix dhogor, dhakaw

5. Aqalka, bah Diigaanyo duqda dabadiisa fadhida xalay wafay, saaka wafay

6. Abtigay sanguduud, saheentii salguduud, sonkii shalayto, shalayto haddaaya, mari wad, mar is wad

7. Diin god gel, god goray gel, goray god gel, god diin gel.

8. Naylayow yari ee sii dhudhun hore dhudhun dambe dhulku gannafsiine. Anaga waxba ha ii dhudhun hore dhudhun dambe dhulku gannafsiine. Orod oo ninkaad u dhudhun hore dhudhun dambe dhulku gannafsiinayso, u dhudhun hore dhudhun dambe dhulku gannafsii.

9. Naaga Taygaro dhiishi turbuc buji, waaryaa Turbuc dhiishi taygaro buji.

10. Sacu sii guduud, weyshu sii gabalo. Ninku sii garaad, aqalku sii gangaan. Nagtu sii gardheer. Sii guduud godoloo, sii gabalo ku duyoo, sii gundhuub ku shubyo, sii garaad ka cabyo, sii gardheer u hambee.

11. Awrka dooxaa sii socdow duuduq dhulgub duuduq dhulgub.


12. Shimbiray guda cas hooyaday gogol cas.


13. Ninkan dheeroow dhala cad, hooyday dheeroo dhar cad.

Weedhahan waa la boobaa marka way adag tahay in sax qofku ugu celceliyo waana la isku halxidhaaleeyaa dhihidooda, waxana loo la dan leeyahay in carruurta la baro sidii ereyada u kari lahaayeen. Afka qalaad waxa lagu yidha (Tongue-Twisters).


# BITTOOYIN







Guun guun
Guma saar
Shala lebi
Laan show
Bile bile
Bile janno
Aw barrow
Barta dhaaf
Tan maahee
Teeda kale
Bay ku timi
Oo ku taal
Biitoy laabo!
Gorayo san dheer
Sankaaga dheer
Sagaaro dhuuxday
Waxa badda jooga
Ayaa ku qaadi
Bakayle buc-buc
Xagguu qabtay
Toggii Wajaale
Muxuu ka doonay



Abeeso daadsan,
Alool la duubay
Daba nignig.
Biitoy laabo

Heestan waxay carruurtu ku heesaan marka ay xoolaha dhexdooda joogaan ee ay ciyaarayaan.

# KUN BULLOW



Kun bullow
Kun bullow
Kun bullaala cadow
Xabag geed ka baxday
Bila bila
Bila jira
Koosaar
Kaba lacag
Oday bislow
Barbaartaa
Kun kun, kun saar
Ta u dheer ee dhexaad
Ku jar oo ku jac sii
Biitoy laabo
Shimbiri qaaday qaynaanisay
Qoys kale tagtay
Ku mergetay — Quru - quru

Heestan waxa carruurtu tirisaa marka ay ciyaaraan biitada.

# GORAYO

Gorayada geel baa la mooddaa!
waa runtaa ee waa la moodaa.

Xuunshadaa xoolaa la moodaa!
waa runtaa ee waa la moodaa.

Dundumooyinkaa duul baa la moodaa!
waa runtaa ee waa la moodaa.

Carruurta ayaa marka ay xoolaha la joogaan isku maaweelisa iyaga oo isu jiibinayn.

## HEESTA MAQASHA

Waadigan qolman e,
Qawdhiidaya e,
Xalay ma qatanayd?
Xalay waan qad oo,
Qool baan galoo;
Qumanyooyinkii,
Way qarinayeen.

## EDEGSO

Xaashiyay naylay,
Xaal gobaadeeday,
Xeedho subageeyay;
Xididka loo loogyey;
Naysha naysheedaay;
Naysha guuleedeey;
Guuleeheed dhawryey;
Guul la soo hoyatoy.
Ina huryo heecow;
Ina habaar moogay;
Ina gabali goohaay;
Ina galaalo carwooy;
Hooyadeed nuugtoy;
Hooya kale ku xadoy;
Loo xalaaleeyey;
Looma xaaleeyay;
Waxay ku daba weyntay,
Waxay ku daanshaysaa,
Caanihii Deylooy;
Doogaan daaqsiiyay;
Damal hadhweyn hurudooy,

Naysha naysheedaay;
Naysha guuleedeey;
Guuleeheed dhawryey;
Guul la soo hoyatoy.
Ina huryo heccow;
Ina nabaar moogay;
Ina gabali goohaay;
Ina galaalo carwooy;
Hooyadeed nuugtoy;
Hooya kale ku xadoy;
Loo xalaaleeyey;
Looma xaaleeyay;
Waxay ku daba weyntay,
Waxay ku daanshaysaa,
Caanihii Deylooy;
Doogaan daaqsiiyay;
Damal hadhweyn hurudooy,
Dixida mayractooy;
Edegsadaan idhi bay;
Soo ebraareen oo;
Soo olkecyeen oo;
Oodda jebiyeen oo;
Umal wareereene.
Hoobeey, hoobeey, hawlo
Naa hawlo, n aahawlo,
Naa hawlo reerkeenu,
Waa reer goboo geele;
Waa reer gammaan farsle;
Waa reer ummulo wiil le;
Waa reer aroosyo cad le;
Waa reer hadduu guuro;
Geenyada cad mooyaane,
Aan garabsi lagu gaadhin.

Waxa hawlo loo yidhiba;
Waa hawl daraadeed e,
Iyo inan yar diliddeede;
Iyo kaga digsiinteede.
Reeraha gudee guuray;
Ee aqaladii goostay;
Hawlay iga soo reebtay.
Hawlooy lugta horuu dhig,
Waad hoombinaysa,
Hawlooy lugta horuu dhig.

Heesahan oo kale carruurtu waxa ay ku hee-saan marka ay maqasha raacaan oo reeruhu guu-raan.

(1) Edegu waa halka lagu xereeyo maqasha, marka la xereenayo waxa la yidhaa «Edegso koo-banay naylayoo».

# DELEB
## ama eray ku tartan

Waa dug iyo deleb:

Madow — Maahir geba gebo

Site — Seeri qalabsade

Caddaan — Warbac dhaydhayan

Cassar — Caano cabe



1. Xaawo-dheer cirka xaabo ka doontay.

2. Kelli faw tidhi kabaal daba yaal kacoo soo qabo.

3. Xabbad xaas deeqda.

4. Dundumo guri yari duumo kaa xoortay.

5. Cuntin macaan geed la kor.

6. Awr madoobi abaar qooq.

7. Geedka yaroow midha bucur.

8. Laba sac saantood is le'eg.

9. Wax dooxan, oo dabran, oo haddana daaqa.

10. Wax maalin oo dhan cirka eegaya, habeen oo dhanna jiifa.

11. Wax dheer oo dheer oo haddii la dhereriyana aan naas riyaad gaadhin.

12. Afar nin oo gogol ku wada fadhiya oo aan haddana gacan qaad isla gaadhayn.

13. Silsilad qubatay sidee loo guri karaa.

14. Mulac mandheer jiid.

15. Inantii idiin soo wareegtay maxaad futada farta uga gelisay.

16. Gurigaannu ka guurnaba wax uun baa sii eegaya.

17. Markaan gurigeyaga soo galaba waxaan arkaa Aabbahay oo hooyaday cunaha haya.

18. Adoo xaaraaya Xamar kaa dhaadhac.

19. Karin baan ka soo dhaxay oo karin kalaan ka soo dhacay, saa waa abtigay hagar oo hargo duubaaya.

20. Wax boqol ilig leh oo aan baruur kala gooyn.
21. Malakh-malakh ma laqanyooto.

22. Wax cirka taar ku leh, dhulka taar ku leh, tagoogo urgi leh oo tunka shaash ku leh.

23. Xaggu gabi oo xaggu gabi oo guntu walac.

24. Nin xun oo hun xun huwan.

25. Nin cas oo ceel ku jira.

26. Nin laba furmood sita oo futada qaawan.

27. Ubadayada siti-siti, sabar xariir, Ilaahay mooyee aadmi ma furi karo.

28. Waxaan biri gooyn oo af gooyo.

29. Qaalmo dhego laa dhudhub soo galay.

30. Wax kun baal leh oon badka boodin.

31. Inantii taynax nin ka taag roon bay isku taagtaay oo isku taynaxisaa.

32. Libaax ku liqyoo ku soo laba celi.

33. Meshaa maroo muuqaa la waa.

34. Subax walba marka aan adhiga sii daayo waxa aan arkaa wankii adhiga u waynaa oo xerada galgalanaaya.

35. Xeradaydu waa wada ul oo ul la qaatu ma laha.

37. Rukin rukin reerka ku meer.

38. Giraangir gabi ka lulata.

39. Diilima cas dugsi fadhi.

40. Ayeyday daba yar dabayshu ma gaadho.

41. Carabba-shaalaa galool hoostii geel ka soo rogay.

42. Sac la qalay feedho qayax.

43. Sicii kal hore la qallay, saantiisii gugay orgootay.

44. Wax so' leh, oo sar leh, oo suun leh, oo seed leh, oo aan rag sooryo loogu geynin.

45. Habar belo ah, waxaro boqol ah hadhuub buqul ah.

46. Jini jini saaran, jini kale saaran, jar ka soo jeeda oo, jalalowda haya.

47. Adhigayagiibaan la soo jiray oo miyir kaygii baan mus xuluushav'



1) Waa dabayshu marka ay cirka isku shareerto.

2) Waa dhuusada

3) Waa qarafka

4) Waa lulada

5) Waa nafta

6) Waa dheriga karaya

7) Waa madiga xoolaha leh

8) Waa cirka iyo dhulka

9) Waa makiinadda gadhka.

10) Waa oodrogada

11) Waa waddada

12) Waa naasaha geela

13) Waa dhogorta adhiga

14) Waa irbada liifaaqan

15) Waa irbadda

16) Waa gambada dumarka

17) Waa udubka iyo dhigta

18) Waa hoosiiska

19) Waa xaarwalwaalka

20) Waa aloolka



21) Waa mindida

22) Waa coomaadaha

23) Waa doobiga caanaha

24) Waa duqsiga

25) Waa carrabka

26) Waa duqsiga

27) Waa naagta uurka leh

28) Waa garta ama meherka

29) Waa daadka



30) Waa kitaabka

31) Waa maroorada

32) Waa aqalka gal oo ka soo bax

33) Waa raadkaaga oo roob kaaga dambeeyo

34) Waa gafanaha

35) Waa geesaha riyaha

36) Waa mareegta maqasha

37) Waa lisinka



38) Waa hilqadaha



39) Waa ugaadha

40) Waa takarta



41) Waa dhuugga

42) Waa inta aan aqalka dadabta la saarin



43) Waa geed soo cawaalo baxay



44) Waa miiilita adhiga



45) Waa qorraxda, xidigaha iyo dayaxa



46) Waa geenyada iyo halyayga fuushan


47) Waa usha.

## SHIRKII HABARDUGAAG



Beribaa habardugaag oo dhami shir qaateen. Waxa ay yidhaahdeen, waar waaka dadkuba is faaniya, inana aan cayaar qabsano oo isfaanino.

Jinacbaa ugu hor booday oo waxa uu yidhi:



Fiqi meel fadhiya futada ka qandhuufte waa ani.

Libaaxba yidhi, «ii xejiya anaa wacdaro idin tusiye. Markaas baa uu soo booday uu yidhi:

Qaalma geesi soo saaroo,
Soolkeer u daaqsiyoo,
Sibir gooye waa ani!

Dhurwaagii intuu soo booday buu yidhi:

Duul nabad ku seexday,
kaga seleshe waa ani!

Dawaco iyada oo si xiinsan u boodaysa:

Baraar banaanka daaqyaan,
Soo balow idhaahdaa,
Badhidaan la boodaayoo,
walle biligu waa ani!

Kolkaas ayaa uu baanay dabagaalle, oo uu yidhi:

Afar hal oo quulla ah,
Qoodhahaan ku laabtaa oo,
walle qaade waa ani!

Qudhaanjo ayaa iyana soo booday waxay raaciisay:

Xeer naagi meel dhigatay,
Ka xagxagato waa ani!

Jiirkiibaa yidhi:

God yar aan samaysta baan,
Isku soo ganaa aan oo,
Lama gaadhe waa ani!

Shabeelka ayaa u daraa oo wuxu yidhi:

Riyo xagaa, oo xagar daaqayaan,
Soo xaabshe waa ani!

Soongurbaa yidhi:

Aslaneey udubdhexaadkii,
Inan wacani waa ani!

Wiyishii baa soo hardadaf tidhi oo way soo booday oo waxay tidhi:

Ma billahay ma baarahay?
Baruur guurtay waa ani!

Gerigii wuxu yidhi:

Geed la gaadhi kari waayoo
Caleentii guudka kaga taal,
Waxa goostay waa ani!

Maroodiga ayaa soo shamaxleeyey; waxa uu yidhi:

Ilkahaygu waa dahab,
Derajooyin lagu qaatiyo,
Boqorradu i daawade!

Yaxaaskii ayaa is xambabuuray oo wuxuu yidhi:

Webiyada butaacayaan,
Baradaydu ay tahay oo,
Beentiyo ilmada gobo' laan
Beerlaxawsi ka dhigaa!



Sakaaradii:

Saaladaydaan qaraayoo,

Maroodiga sinaha weyn,
Socodkay gafsiisaayoo,
Simbiriirix siisaa!

Bakaylaa yidhi, «anaa ka boodaya, ee hadda ii banneeya:

Baacsi iyo cayaartiyo,
Bannaankaan ordaayiyo,
Bur ka boode waa ani!



Galowgii ayaa soo boodey oo waxa uu yidhi:

Ninka galow la leeyahay,
Laba galac garbaha saar,
Gaashaan wiyil ah qaad,
Geel boqol ah soo dhici.

Gafanihiiba is yidhi yaan lagu yasin oo waxa uu yidhi:



Geelaad tilmaamayso,
Gendi iyo cadho ba ha gashee,
Guudkaan ka fuulaa oo
Dhiigaa ka gobo' leeye,
Kaga gooje waa ani!

Goraybaa soo mushaaxay oo waxa uu yidhi:

# TIRA KU TARTAN

Kow — Kowaale

Laba — Liibaanle

Saddex — Saala cadde

Afar — Oori bidho

Shani — Sheekeysay

Lixi — Laanqaaday

Todobi — Talisay-
talo same

Sideetan — Sitaac

Sagaashan — Cawreer

Boqol — Ar bodhlow
boqol.

# SHEEKO DHAMAATAY

Sheekoy, Sheeko,

Sheeko xariir ah;


Sheeko dhamaatay;

Carruuray shibdhe;

Shimbirihi seexde;

Dugaagiina seexay;

Idinkuna seexda.





Waxaa Lagu Daabacay

Madbacadda Qaranka